Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad

Documentiga Kal.7-aad kul.gaarka ah 1-aad **25/10/2015**

Kalfadhiga 7-aad

Kulankiisa gaarka ah 1-aad Saac.fur.12:15gd.Saac.Xir.1:17 gd.

Guntinta(Quorum) 141-Xildh.

Ajendaha:-

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
2. **Soo dhaweynta iyo Hadal jeedinta Guddoomiyaha Golaha Shacabka**
3. **Hadal jeedinta Madax-weynaha JFS ee ku abaaran furitaanka kal.7-aad**
4. **Xiritaanka kalfadhiga gaarka ah.**

1.Shir-guddoomiye,Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS.Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari).

2.Waxaa shirka Furey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS.Mudane, Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari),wuxuuna sheegay in Xildhibaanada Golaha Baarlamanka ay ku soo dhawaadaan kulanka gaarka ah 1-aad ee kalfadhiga 7-aad.in maanta sida Dastuurka uu qabo uu Golaha Imaanayo Madax-weynaha JFS.Mudane Xasan Sheekh Maxamuud si uu u furo Kalfadhiga 7-aad kulankiisa gaarka ah ee 1-aad,Ajendahana uu yahay 3 qeybood ,wuxuuna ka codsadey in Xildhibaanadda ay ansaxiyaan Ajendaha shirka Xildhibaanadana wey ansaxiyeen.

Wuxuu kaloo intaa ku darey in maanta laga bilaabo uu baarlamanka shirarkiisa ay noqonayaan mid life looga daawado dunida dacaladiisa.

3.Guddoomiyaha wuxuu u sheegay in uu soo dhaweeyo Guddoomiye K/X.1-aad Mudane Jeylaani Nuur Iikar Madax-weynaha JFS. Mudane Xasan Sheekh Maxamuud.

4.Kadib, Guddoomiyaha wuxuu ku soo dhaweeyey Golaha Baarlamanka Madax-weynaha JFS. Wuxuuna hadalkiisa soo dhaweynta ku bilaabey,Mudane Madax-weyne ,Mudane Ra'iisul Wasaare ,Mudane Ra'iisul Wasaare k/xigeen ,Guddoomiyaha Maxkamadda sare,Xildhibaanada martida iyo muwaadhiniinta sharafta leh ,Ajendaha manta wuxuu ka kooban yahay 4 qodob sida caadado ay tahay waxaa qasab ah in guddoomiyaha warbixin bixiyo, maanta waa kulanka gaarka ah 1-aad ee kalfadhiga 7-aad,Qourumka waa 141 Xildhibaan ,wuxuuna u jeediyey Madax-

weynaha in uu shirka u furo ,wuxuu u yeerey Xildhibaan Wasiir, C/qaadir Baqdaadi ,in uu akhriyo Aayadaha Qur'aanka Kariimka ee Furitaanka Kalfadhiga.

5.kadib ,Guddoomiyaha Golaha Baarlamanka ,wuxuu sheegay in ay galayaan kalfadhiga 7-aad ayna ka soo gudbeyn kalfadhigii 6-aad soona dhameystireyn 3-sharci iyo 5-qaraar,haddana ay galayaan shaqada ugu xoogan ee la rabo in la qabto lana meelmariyo Qodobadda Dastuurka loona baahanyahay in Xildhibaanada ka kooban 275 ay wada joogaan wuxuuna ogeysiiyey Xildhibaanada,kutagalkoodana uu yahay November 15-keeda danbe in loogu doodo Dastuurka Dalka,Culeyska ugu weyn kalfadhigaan waa Dastuurka.

6.Guddoomiyaha wuxuu intaa ku darey in shaqooyinka la labalaabo Sharci kastana wuxuu marayaa 3-wareeg midka 4-aad waa ansaxinta sharciga.

Shuruucda hadda yaala waa shuruucda kala ah : -

- **Sharciga Dhisidda Maxkamadda**
- **Sharciga Dastuurka**
- **Sharciga Maalgashiga**
- **Sharciga Xuquuqo Aadanaha**
- **Sharciga Saxaafadda**
- **Sharciga Axsaab Siyaasadda**
- **Sharciga Been Xalaaleynta iyo Maalgelinta Argagixisada**
- **Sharciga Xisaab Xirka 2014-ka**
- **Sharciga Dhaqan gelinta Miisaaniyadda 2016-ka**

Sharciyadaan waa sharciyadda hadda yaala ,kuwa marey Akhrinta 1aad,2-aad iyo 3-aad, wuxuu kaloo intaa ku darey in la sameeyo maskax tashiil badan . Ayaamahaan waxaa la wadaa Baarlamanka wuu kala tagay ,Baarlamankaan waa mid sharci ah uuna u gudbiyey shacabka Soomaaliyeed Howl-qabadkiisa. Waxaa loo xilsaarey Guddoomiye k/xigeenka 1-aad iyo Guddoomiye K/Xigeenka 2-aad in ay ka shaqeeyaan howlaha shaqo ee Golaha Shacabka isgana uu u madax bananyahay in uu la shaqeeyo Guddiga Dastuurka iyo Guddiyadda Kale. Wuxuuna u mahad celiyey Radio Muqdisho Somali .Net ,Shacabka Soomaliyeedna ugu hamblyeeyey in maanta wixii ka danbeeyo ay si toos ah ugula socondoonaan Televishanka Qaranka shirarka ka dhacaaya Baarlamanka ,wuxuu u mahad celiyey Golaha Shacabka.wuxuu kaloo intaa ku darey in la qeybiyo heshiiskii si ay u soo akhristaan Xildhibaanadda.

7.Guddoomiyaha wuxuu ku soo dhaweeyey Madaxweynaha JFS. Mudane Xasan Sheekh Maxamuud, wuxuu furey kalfadhigii 7-aad ,khudbadiisana wuxuu ku bilaabey : -

Asalamu Caleykum , maanta waa maalin weyn oo taariikhi ah qeyb waxay tahay 6-dii kalfadhi ee la soo dhaafay waxaa noo qabsoomay shaqo aad u ballaaran,wax noo qabsoominna ay jiraan oo ah wax yar .

Dowladnimado sideedaba waa sharci haddii uu gaabis ku jiro waa wax adduunka oo dhan ka jira.

Beesha caalamka waa inoo soo gurmadeyn ,nabadgeliyadda iyo dhaqaalaha waxbey nagala qabteyn .Siyaasad waa wax Soomaali iska leedahay cid nagu taageerikarta ma jirto balse

cidda quseysa dhaxdooda ayaa ka heshiin kara oo sameysan karta siyaasad,wuxuuna soo jeediyey in Siyaasadda lagu heshiiyo si loo helo Dowladnimo .

Wuxuuna soo jeediyey in Golaha Shacabka ay dardargeliyaan Ummadda shaqadii ay u egmadeyn .markii sharciga lagu tunto waa la arkay wixii ka soo baxay, haddana Dowlada dhisidda waa sharci,haddii Sharci la waayo dowladnimana waa la waayey ,haddii uusan baarlamankana shaqeyneynin ,dowladna ma shaqeyneyso,In siyaasadda laga mideysnaado oo lagu heshiiyo siyaasadda iyo nadaamka dalka ,siyaasadda hal maalin laguma xalin karo.

Maanta wixii qabsoomey Guddoomiyaha Golaha in uu sheego ayaa ficneyd .Dowladnimado waa sharci waa inuu jiraa Nadaam iyo kala danbeyn.

Baarlamanka Federaalka Soomaaliya arrinta hadda laga dhawaajiyey,waxkasta way qoranyihiin waa dukomenti lagu wada heshiiyey ,waana wax qoran uu baarlamanka heysto. Waxaa laysla gaartey in aan la gaarikarin doorasho duruufo jira awgood ,waxaa laysla gartey in lagawada tashado oo laysla fariisto ,nadaamka hadda lagu heshiiyey waxaa laga rabaa in Baarlamanka uu sharciyad u helo .waxaa kale oo laysku af-gartey in la helo tashi ballaaran oo ay ka qeybgalayaan dhamaan,Odayaal,Dhallinyaro, Aqoonyahano iyo Bulshada Rayidka ah.,waxaa loo baahan yahay in uu soo maro hal process Xukuumadda uu baarlamanka Sharciyeeyo kadibna Madax-weynaha uu sharciga saxiixo.

Wuxuu kaloo sheegay in Sharciga lagula dagaalamaayo Argagixisadda waa mid muhiim ah oo loo baahanyahay ,waa in uu baarlamanka Sharci ka soo saaro sida lagu xakameyn lahaa,wuxuuna soo jeediyey in loo baahanyahay in lala shaqeeyo habeen iyo maalin.

Arrinta Dimoqaraadiyadda waa in la soo dedejiyaa wixii ka harey Sharciga ,waa tii Baarlamanka uu ansaxiyey Qof kasto Soomaaliya oo qaangaar ah uu ka qeybgalikaro Doorashada , wuxuu soo jeediyey wixii suura gal ah in laga tasahado ,Sharciga waa adeega dadka ay sameysteyn maalintaa waa in laga tashto wixii la sameyn lahaa.

Wuxuu kaloo sheegay in aysan jirin wada tashi oo aan Baarlamanka Federaalka aan ahayn,kan ugu horeeyo waa qaraaro ,Maamul Goboleydyada oo dhan waa la tagayaa hay'adaha Dawladda iyo Bulshada rayidka ah ayaa laysku wada geynayaa waxaa ka soo baxaaya 1(Hal) sheey oo lagu xukumidoono ,lagu ciqaabidoono ,lagu abaalmarindoono ,meeshaa ma'ahee meel kale la marikaro ma jirto

Guddoomiyaha shuruuc badan oo aad iyo aad u muhiim ah oo Baarlamanka horyaala ayuu

Akhriyey wuxuu sheegay in uusan ku arkin Sharciga argagixisada ,Wiil yar oo Bombo qarxiyey keliya ma aha in la horgeeyo sharciga oo la xukumo,cidda ka soo shaqeysey iyo cidda maalgelisey iyo cidda ka qeyb qaadatey intuba in la horgeeyo Maxkamadda lana xukumo.

Sharciga Maalgashiga wuxuu sheegay in dadka maalgashanaaya dalka la ilaaliyo, habeen iyo maalin lala shaqeeyo xuquqdiisana la siiyo. Arrinta sharci dejinta ah waxaa loo baahan yahay in xitaa la shaqeeyo Maalmala Jimcadda ah.

Madax-weynaha ,wuxuu kaloo sheegay in uu jeclaan lahaa in raadiyaasha iyo Televishanada ay u baahiyaan Caalamka qaabka ay rabto in ay Soomaaliya gaarto .

Qaramada midoobey waxay Soomaaliya u dooratey xubin dhanka dhaqaalaha. Wuxuu kaloo sheegay in ay ogyihiin in dadaka ay isweydiinayaan waxa Baarlamanka maanta uu ka hadley. Waxay kaloo doonayaan in ay dhaqangeliyaan xagga Hufnaanta iyo isla xisaabtan dhab ah in la gaaro dowlad daahfuran oo la ogyahay qofba hantida uu leeyahay.

Xiriirka Caalamka, maalinba maalinta ka danbeysa way soo badanayaan ,waxaa soo kordhaya shirarka Caalamka oo kaalmo lagu siinayo dowladda Soomaaliya.

Wuxuu sheegay in ay rabaan in Baarlamanka uu cad yahay wuxuu qabtey waana la ogyahay,waxay na asal u yihiin waa qawaaniinta lagu gaarayo ,waan inoo dhanyihiin .wuxuu soo jeediyey in ay iska dulqaadaan oo ay tiigsadaan hadafkooda ,wuxuu ku soo agmeerey Khudbadiisa Kalfadhiga 7-aad kulankiisa gaarka ah ee 1-aad uu furanyahay.

Kalfadhiga 7-aad kulankiisa gaarka ah ee koowaad uu shir-guddoominaayey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari)uu xirmay saacaddu markey aheyd 7:15gd.